

Tilmaamaha Barnaamijka BEGAP

Guudmarka Barnaamijka

Wakaaladaha Ganacsiga iyo Hormarinta Bulshada ee Vermont waxaa sharaf u ah inay ku dhawaaqdo abuurista Barnaamijka Caawimada Kalago'a Xaalada Degdega ah ee Ganacsiga (Business Emergency Gap Assistance Program, BEGAP). Barnaamijkan deeqda \$20 milyan ah bixinaya waxaa loogu talo galay ganacsiyada iyo ururada khayriga ah ee ay waxyeelada dhisme kasoo gaartay daadadkii dhacay Luulyo 7, 2023. Barnaamijkan lama filaayo inuu cidna si buuxda u kabo laakiin waxaa loo sameeyay inuu gurmada degdega ah baxsho si looga caawiyo ururada inay dib u furmaan ayna shaqaalahooda shaqada ku ceshaan sida ugu dhakhsaha badan. Codsiyada waxaa loo aqbali doonaa qaab taxane ah ilaa dhammaan lacaguhu ay dhamaadaan.

Haddii aadan ku hadlin Ingiriis aadna u baahan tahay turjumaad, fadlan la xiriir shaqaalaha ACCD (ACCD.BizFloodGrant@Vermont.Gov) si laguugu xiro adeegyada turjumaada ee Gobolku qandaraaska kula jiro.

U qalmida Codsadaha: Ganacsiyada iyo ururada khayriga ah ee ay waxyeelada dhisme kasoo gaartay intii lagu jiray daadka lagasoo bilaabo Luulyo 7, 2023.

Si uu ugu qalmo, codsade waa inuu yahay ganacsi ama urur khayri ah oo buuxshay shuruudaha soo socda:

- Waa inuu jiray kahor daadadkii Luulyo 2023
- Waa in waxyeelooyinku soo gaadheen dhisme ku yaala Vermont
- Goobta shaqooyinka ganacsiga iyo/ama hantida ganacsigu waa inay waxyeelooyin dhisme kasoo gaareen daadka Luulyo 2023
- Marka laga hadlayo deeqda BEGAP, waxyeelooyinka dhismaha waxaa ka mid ah waxyeelada ku dhaca dhismaha, hormarinnada dhismaha loogu samaynayo kiraystaha, kaydka, alaabta, mashiinnada, iyo qalabka.
- Waa in la doonaayo in dib looga furo isla goobtii ama meel kale oo ku taal Vermont loona adeegsan doono lacagaha deeqda isla ujeedadaan.

Waxyaabaha soo socda ayaa ah shirkadaha aan uqalmin:

- Degmooyinka
- Ganacsiyada ama ururada khayriga ah kuwaasoo ay gaareen keliya dhawaac dhaqaale (waayitaanka dakhliga)

Xisaabinta Deeqda

BEGAP ayaa ka caawin doonta codsadeyaasha qarashaadka wadarta **waxyeelooyinka aan la kabin**. Waxyeelada aan la daboolayn ee wadarta guud waa waxyeelada aanu kabin caymiska, deeqaha dheeriga ah, iyo tabarucaadku.

Codsadeyaasha ay ka dhiman tahay lacag ka yar \$1,000,000 oo ah waxyeelada aan la kabin:

- Ka yar labada 20% waxyeelada aan la kabin ama \$20,000

Codsadeyaasha galay waxyeelo aan la kabin oo ka badan \$1,000,000:

- Deeqda waxaa lagu jaangooyaa kolba ka yar 20% waxyeelooyinka aan la kabin ama
- \$100,000 haddii codsadhaha ay u shaqeeyaan inta u dhexaysa 1 iyo 10 shaqaale waqti buuxa ah*
- \$250,000 haddii codsadhaha ay u shaqeeyaan inta u dhexaysa 11 iyo 50 shaqaale waqti buuxa ah
- \$500,000 haddii ay codsadhaha u shaqeeyaan 50 shaqaalaha waqtiga buuxa ah

Codsade ayaa soo gudbin kara ilaa sadex codsi oo uu soo gudbisanayo sadex dhisme oo kala duwan.

Codsadeyaasha soo gudbinaya codsiyada wax ka badan hal dhisme oo ay gaareen waxyeelooyin ka balaaran \$1,000,000 waxay keliya u qalmaan deeqda la kordhiyay (ka badan \$20,000) halkii codsi.

*FTE waa cadadka u dhigma waqtiga buuxa ee shaqaalaha Vermont dagan kahor daadka

Xogta Codsadhaha

Codsiga ayaa ka doonaaya dhammaan codsadeyaasha inay bixiyaan xogta soo socota. Codsadeyaashu waa inay u diyaar garoobaan inay bixiyaan:

- Macluumaadka lagala xidhiidhayo
- Goobta dhismaha waxyeeladu ku dhacday iyo xogta mulkiyada
- Lambarka Aqoonsiga Canshuurta Loo shaqeeyaha ee Federaalka (FEIN)
- Xogta shirkada caymiska
- Lacagta lagu kabayo waxyeelada ee la filayo in laga helo caymiska
- Deeqaha ama tabarucadaha kale ee ay heleen ayna codsadeen si loo dayactiro ama dib loogu furo ganacsigaaga.
- Faahfaahin ku saabsan saamaynta daadku ku keenay codsadhaha
- Nooca waxyeelada iyo qiyaasta qiimeyaasha dayactirka/badelka
- Qiyaasta hoos udhaca dhaqaalaha iyo faahfaahinaha (khasaaraha la filaayo ama dhabta ah ee ku dhacay dakhliga)

Dukumiintiyada loo Baahan yahay:

- Canshuur Celintii ugu Danbaysay ee Federaalka (ama 990)
- Cadeynta Faa'iidada iyo Khasaaraha dakhliga haddii ganacsiga la bilaabay 2023
- Foomka W-9 IRS oo xogtii udambaysay ku xusan tahay
- Dukumiintiyada caddaynaya waxyeelooyinka la sheegay (warbixinta qiimeyaasha caymiska, qiyaasaadka adeeg bixiyaha)
- Qiyaasta dayactirka loogu talo galay dhismaha, qalabka, kaydka, iibabka agabka ama kharashaadka rasmiga ah ee baxay
- Sawirada dhismaha waxyeeladu ku dhacday (ugu badnaan 5 xabo)
- Cadeynta mulkiyada dhismaha (haddii ay jirto)

Tixgelinnada Dheeriga ah

- Codsiyada aan dhamaystirnayn ayaa lagu celin doonaa codsadeyaasha si ay u soo saxaan waxaana dheeraan doona waqtiga la dhamaystiri doono.